# Xaquuqaha iyo Waajibaadka saaran Bukaanka

**Mayo Clinic Store**

## XUQUUQDA BUKAANKA

Xuquuqda gaarka ah ayaa lagu qoray hoos.

Ka bukaan ahaan, aniga, ama wakiilkayga sharciga ah, ayaa xaq u leh:

- Inaan helo daryeel ayadoo aan laga eegayn isirka, caqiiqadada, midabka, wadanka, asalka, diinta, jinsiga, dookha galmada, xaalada guurka, da'da, xaalada ilmaha cusub, naafada, ama isha lacagta.
- Inaan awoodo inaan aqoonsado shaqaalaha Mayo Clinic Store anoo eegaaya aqoonsigooda saxda ah.
- In si buuxda la iigu sheego xili hore daryeelka/adeegga la i siinaayo, ayna ku jiraan adeegyada baxsha daryeelka, inta jeer ee aad booqanayso, iyo sidoo kale isbadello kasta si aad u qorsheysato daryeelka.
- In xili hore la ii sheego daryeelka/adeegga la bixinaayo iyo masuuliyadooda dhaqaalaha.
- Inaan helo xog ku saabsan heerka adeegyada ee ururku uu bixinaayo iyo xadiyada gaarka ah ee adeegyadaas.
- Inaan ka qaybgalo hormarinta iyo dib u eegista mararka qaar ee qorshaha daryeelka.
- Inaan diido daryeelka ama daawada kadib marka cawaaqibyada diidmada daryeelka ama daawada si buuxda la iigu sharxo.
- In hantideyda iyo shaqsiyadaba loola dhaqmo si qadarin leh, tixgelin leh, oo la aqoonsado sharafta iyo shaqsiyadak bukaanka.
- Inaan la igula kicin fal xun, dayacaad, ama xadgudub afka ah, dhimirka, galmada, iyo mid jirka ah, ayna ku jiraan dhawaacyada aan la aqoon meesha ay ka yimaadaan, iyo si khaldan u adeegsiga hantidayda.
- Inaan soo gudbiyo cabashooyinka/tabashooyinka la xiriira daawada ama daryeelka ama inaan la isiin qadarinta hantida, ama soo jeedinta isbadellada xeerka, shaqaalaha, ama daryeelka/adeegga ayadoo aan la igu samayn xanibaad, faro gelin, caburin, takoor, ama aargoosi.
- Inaan soo gudbiyo cabashooyin/tabashooyin ku aadan daawaynta ama daryeelka la bixiyay (ama lagu fashilmay in la bixiyo), qadarin la'aanta ku aadan hantida la baaray.
- Inaan helo xog ku aadan cabasho/tabasho kasta oo aan soo gudbiyay wakhtiga loo cayimay gudihiisa ee uu qabo sharciga federaalka.
- In dhammaan fariimaha iyo diiwaannada ku saabsan caafimaadkayga lagu hayo meel qarsoodi ah.
- In talo la iga siiyo xeerarka iyo habraacyada wakaalada ee quseeya shaacinta diiwaannada caafimaadka.
- Inaan awoodo inaan doorto dhakhtar caafimaad.
- Marka la i dhigo Mayo Clinic Store, inan helo dukumiintiga Xuquuqda iyo Waajibaadka Bukaanka iyo in la ii ogolaado inaan waydiiyo su'aalo kasta.
- In la ii sheego faa'iidooyin kasta oo dhaqaale marka la igu xiro ururka.
- Inaan helo turjumaada iyo fasiraada luuqada si bilaash ah. Shaqaalaha Mayo Clinic Store ayaa caawimaad dheeri ah siin kara dadka qaba naafooyinka maqalka ama aragga.

## WAAJIBAADKA BUKAANKA

Waajibaadka gaarka ah ayaa hoos ku qoran.

Ka bukaan ahaan, aniga, ama wakiilkayga sharciga ah, ayaa masuul ka ah:

- Bixinta qaybaha caymiska ama lacagaha caymisku jarto ee ay go'aamiso shirkada caymiska.
- Inaan u sheego shaqaalaha Mayo Clinic Store isla markaba haddii shirkadeyda caymisku isbadesho si loo xaqiijiyo buuxinta sheegashooyinka si sax ah oo wakhtigeeda ah.
- Inaan u sheego shaqaalaha Mayo Clinic Store joojinta isticmaalka qalabka kirada ah ee joogtada ah.
- Inaan u sheego shaqaalaha Mayo Clinic Store isla markaba haddii aan galo xarunta kalkaalisada xirfada leh, xarunta daryeelka dadka dhimanaaya, ama aan helo adeegyada caafimaadka ee guriga.
- Inaan dib u dalbato agabka keliya marka cadadka hadda ii yaalo uu sii dhamaanaayo, waxyeelo gaarto, ama burburo.
- Inaan door firfircoon ka qaato daryeelkayga.
- Inaan waydiiyo su'aalo marka aanan fahmin waxa la iiga sheegay daryeelkayga. Waxaan waydiin karaa su'aalaha sida kuwa hoose oo kale ah haddii aanan aqoon wax aan waydiiyo.

  Waa maxay diiradeyda ugu muhiimsan ee daryeelka?

  Maxaan u baahan nahay talaabada xigta inaan sameeyo?

  Maxay muhiim iigu tahay inaan sidaan sameeyo?
- Inaan run u sheeg shaqaalaha Mayo Clinic Store haddii aanan fahmin tilmaamaha ama haddii aanan awoodi doonin inaan ku sameeyo guriga.



MC1234-194SOrev0224

- Inaan waco dhakhtarkayga ama bixiyahayga si aan ugu sheego isbadellada xaaladeyda.
- Inaan aqbalo natiijooyinka ficiladeyda haddii aan doorto inaan ka qaybgelin qorshaha daryeelka sida uu amray dhakhtarkaygu.
- Raac xeerarka badqabka.
- In aanan khatar gelin ama waxyeelo u gaysan shaqaalaha Mayo Clinic Store.

## HORMARKA MAAREYNTA CABASHADA

Haddii aan ku fashilano inaan buuxino filashooyinkaaga, waxaan kugu casuumaynaa inaad nala wadaagto walaacyadaada quseeya badqabkaaga iyo tayada daryeelka:

- Shaqaalaha Mayo Clinic Store
- Maamulaha iyo/ama agaasimaha xarun kasta oo kamid ah Mayo Clinic Store
- Xafiiska Khibradaha Bukaanka

Waxaan kugu boorinaynaa inaad nala wadaagto cabashooyinkaaga isla markaba. Haddii aad dareemayso in wax kamid ah cabashooyinkaaga ama walaacyada aan la xalin, waxaad bilaabi kartaa cabasho rasmi ah oo aad u dirayso Xafiiska Khibradaha Bukaanka adoo wacaaya 1-844-544-0036 ama iimeel u diraaya opx@mayo.edu. Haddii aad dooneyso inaad boostada ku dirto ogeysiiska cabashadaada, ku dir boostada:

Office of Patient Experience
200 First Street SW
Rochester, MN 55905

Waxaa kula soo xiriiri doona Xafiiska Khibradaha Bukaanka si uu kaagala hadlo cabashooyinkaaga uuna u bilaabo hawsha dib u eegista. Xogta waxaa dib u eegis ku sameyn doona shaqaalaha ay qusayso iyo hogaanka ku shaqada leh daryeelkaaga. Warqad ayaa laguu soo diri doonaa 5 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood taasoo xog cusub kaa siinaysa in dib u eegis la wado. 14 maalmood gudahood, waxaa laguu diri doonaa natiijada cabashadaada oo qoraal ah.

Haddii aqoontaada Ingiriisigu kooban tahay (LEP). turjumaan ama xogta qoraalka sida saxda ah loo turjumay ayaad helaysaa.

Waxaad sidoo kale codsan kartaa liiska wakaaladaha xogta oo aad ka helayso Xafiiska Khibradaha Bukaanka. Haddii aad doorato inaad adeegsato hanaanka cabashada ee Mayo Clinic Store, ama haddii aan awoodi wayno inaan xal u helno cabashada ilaa heer aad ku qanacdo, waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad la xiriirto wakaaladaha soo socda:

Accreditation Commission for Healthcare
(ACHC, Ururka Bixinta Aqoonsiga Daryeelka caafimaadka)
1-855-937-2242

Medicare
1-800-633-4227



©2024 Mayo Foundation for Medical Education and Research. All rights reserved. MAYO, MAYO CLINIC and the triple-shield Mayo logo are trademarks and service marks of MFMER.



MC1234-194SOrev0224